Hiigsiga Cusube

Xaqiiqda Jirta

- 1,5 Billion oo qof ayaa ku nool ayaa ku nool waddamada colaadaha iyo xasilooni-daridu ay saamaysay.
- Boqolkiiba toddobaatan (70%) waddamadani waxay colaaddu saamaysay 1989kii
- Isbeddelada aasaasiga ah ee hannaanka-dawladeedi waxay qaadan karaan 20- 40 sano.
- 30% Kaalmooyinka dhanka horumarinta (ODA) waxay ku baxaan waddamada aan xassiloonayn & deegaanada ay colaaddu saamaysay.
- Waddamadani waxay aad uga fog yihiin hiigsiga ahdaafta horumarineed ee Malleeniyamka (MDGs)

Nidaamka iyo hawlaha ka socda waddamada ay colaaddu ka jirto waxay u baahan tahay in si wayn wax looga baddalo. marka la eego dadaalka maalgalin iyo ballanqaadkii bayaanka mucaahaddada Paris ee gargaarka ee 2005ka (Paris Declaration On Aid effectiveness) iyo qorshaha waxqabad ee Accra (2008), waxaa la odhan karaa natiijadii ka dhalatay iyo qiimaha lacagtuba aad bay u hoosaysay.

In laga gudbo caqabadaha colaaddu waxay noqon kartaa arin waqti dheer qaadata, waji siyaasadeedna leh, waxayna u baahan tahay hoggaan iyo lahaansho dawladeed. qorshayaashii looga gol lahaa in la gaasho tanaazul siyaasadeed waxay ku dhamaadeen fashil, waxaana sabab u ahaa kalsooni la'aan, iyadoon loo wada dhamayn iyo hoggaan daro.

Beesha caalamku waxay inta badan ka gabi-dhaclaysaa inay ahmiyad khaas ah siiso danaha qaranka iyo hawl-wadeenada, waxayna kaalmooyinka dhaqaale ku bixisaa nidaam xirfadaysan oon la jaanqaadi karin masaaliixda iyo wada-heshiisiintii laga rabay heer qaran iyo mid degmo, waxay qorshooyinkeeda ku jaangoysaa aragti dhaw, kumana xisaabtanto istaraatiijiyad wadata qorshe fog, kaasoo u baahan sare u qaadidda tayada dawladda iyo in la dhiso nidaam la raaco, sidaa darteed in la helo Hiigsi cusub oo lagula tacaalo dawladaha aan deggenayn waa qadiyad muhiim ah.

Himilada

Anaga oo ah xubnaha wada hadalada caalamiga ee ku salaysan qorshaha nabad abuuris iyo midka dawladeed (The Dialogue), kana kooban kooxda g7 ee matalaysa 19ka dawladood ee ay colaaduhu saameeyeen, hay'adaha iskaashiga horumarka iyo ururada caalamiga ahba waxaan aaminsanahy in hannaan cusub iyo istaraatiijiyad kuwii hore ka baddalan, kuna salaysan baahida iyo caqabadaha ka jira dawlada ay colaaddu saamaysay ay muhiim u tahay in nabad waarta ay bulshadaasi helaan.

Waxaana shaxdan lagu soo bandhigay Hiigsiga Cusub ee lagula tacaalayo dawladaha aan deggenayn (The New Deal).

Hiigsigan cusub oo ka ambaqaadaya mabaadii'da ku qeexan Bayaankii Maleeniyamka iyo midka tubta Monovia (Monovia roadmap), ayaa wuxuu qeexayaa hannaanka nabad lagu gaadhi lahaa iyo maamul dawladeed sidii loo abuuri lahaa, wuxuuna u marayaa in dib loo abuuro kalsoonidii lagu wada shaqayn lahaa si loo gaadho najiijo ka fiican kuwii hore.

Waxaan aqoonsannahay in guusheenu ay ku xidhan tahay hadba wada-shaqaynta aan yeelano, waxaana keeni kara hoggaan tayo leh iyo dadaalka kooxda g7 oo ay beesha caalamkuna garab taagan tahay. waxaa kale oon aaminsanahay in hanaan maamul oo awoon siinaya qaybaha dumarka, dhalinyarada iyo beelaha la hayb

sooco ay dhagax dhig u yihiin sidii najtiijo sare iyo guulba looga gaadhi lahaa nabad waarta iyo dhismo dawladeed, arintan waxay bilow u tahay Hiigsiga cusub.

Hiigsiga Cusub

Anagoo ah xubnaha wada hadalka waxaan si rasmi ah u ansixinay aragtida Hiigsiga cusub, waxaan ballan-qaadaynaa u ololaynta iyo tallaabooyinkii lagu dhaqan-galin lahaa.

- Waxaan isku waafaqsanahay ahdaafta nabad-yagleelidda iyo dawlad-abuurista (PSGs) inay aasaas u yihiin sidii midho looga keeni lahaa qorshaha horumarin ee maleeniyamka (MDG) kaasoo nagu hagaya sidii loo xalin lahaa arimaha waddamada ay colaaddu saamaysay iyo kaalinta beesha caalamka kaga aaddan ee ah qiimayn heer caalami iyo mid waddanba ah.

- Waxaa naga go'an inaan diiradda saarno nidaam cusub oon ku wajahyno xaaladdeena, kaasoo ku salaysan in dhibkan looga baxo lahaansho umadeed iyo xilkasnimo qaran, dhanka kalena ay kooxda g7 qiimayn dhab ah ku samayso xaaladda iyadoo kaashanaysa waddamada deeqda bixinaya iyo mucaahadooyin (compact) muujinaya sidii loo dhaqan galin lahaa ahdaafta iyo qorshaha dalka. waxaa dhanka kale muhiim ah inay nabadaynta iyo dawlad dhisidduba ay yihiin kuwo loo marayo is af garad siyaasi loo wada dhan yahay.

- Waxaa naga go'an inaan yeelano kalsooni aan ku wada shaqayno si ay u suurogasho inaan maarayno khayraadka iyo hantidaba, isla markaana aan u keeno natiijo cad. waxaan sare u qaadi doonaa isla xisaabtanka, maaraynta hantida si aan tayada hawlaha qaranka sare ugu qaadno.

I. Peacebuilding and Statebuilding Goals – PSGs

Anaga oo ah ergooyinka wadahadalakan waxaan ku heshinay inaan raacno ahdaafta dawlad dhisidda iyo nabad-abuurista, iyada oo gogoldhig looga dhigayo nidaamka horumarineed ee maleeniyamkan,

Haddaba shantan qodob waxay kala yihiin:

- Aragti siyaasadeed oo hufan: isu-keenid dhinacyada is khilaafsan iyo xalinta dhibka jira
- Amaanka: sugidda amniga bulshada
- Caddaalad: in al tilmaamo caddaalad darada jirta isla markaana la keeno
- Dhaqaale abuuris: abuuris ilo dhaqaale iyo kor u qaadidda nolosha dadka
- Dakhliga & adeegyada: maaraynta dakhliga guud iyo in kor loo qaado tayada hanti-dhawrka iyo adeegga

Nabad abuurista iyo dawlad yagleelidduba waxaa lagu jaangoyn doonaa baahida heer qaran, waxay labaduba ku salaysnaan doonaan aragtida qaranka, waxayna ka turjumi doonaan hadba baahida jirta. waxay si joogta ah u wargalin doonaan beesha caalamka iyo hay'aadka dawliga ah ee deeqda bixiya, waxayna xaqiijin doonaan sidii dawladaha daciifka ah ay deeqdaasi u gaadhi lahayd iyo nidaamka loo sii mari lahaa.

Bisha September ee sanadka 2012ka, waxaa jiri doonaa hannaan ama halbeeg lagu garan karo inay dawladaha taagta darani hor mareen iyo in kale, waxay deeq-bixiyayaashu awood u yeelan doonaan inay dagal ku sameeyaan deeqda baxday iyo inay keentay horumar.

Waxaan balan qaadaynaa inaan ka lib keeno nidaamka nabad abuurista iyo dawlad yagleeddiba anagoo u hoggaansamayna aragtida maleeniyamka ee la higsanayo sanadka 2005 ta, kuna qeexan qodobada u qoran qaramada midoobay.

II. FOCUS – Taageerid aragtida ah "lahaansho", in waddanku hormuud ka noqdo, lana yimaado tubtii loga bixi lahaa dhibka

Waxaa qayb ka ah aragtida hiigsiga cusub waxaanku talo jirnaa inaan la nimaad aragti ku salaysan sinnaan dhamaan dhinacyada is haya iyo in waddanku la yimaaddo lahaansho siyaasadeed, iyada oo ay garab taagan yihiin kooxda G7+ iyo dhamaan hay'aadka deeqda iyo kaalmada bixiya, waxaan aqoonsannahay in wada hadal siyaasadeed oo ay u dhan yihiin dhamaan ergooyinka wax matalaya iyo dhisida ururo bulsheedyyaduba inay yihiin tubta ugu haboon ee looga bixi karo carqaladda jirta.

F – Qiimayn dawladeed: Waxaan samayn doonaa qiimayn xilli go'an leh oon ku dhiraandhirino asalka dhibaatooyinka iyo saamaynta ay keeneen. qiimayntaasi waxay ku salaysnaan doontaa hal aragti iyo hal qorshe, waxaa qiimayntaa qayb ka ahaan doona dhamaan ergooyinka iyo hay'adaha heer qaran intaba.

O – Aragti & qorshe isku mid ah: Waxaan samayn doonaa hal aragti iyo qorshe isku mid ah, loona wada dhan yahay, isla markaana ku salaysan aragtidii ahayd in dalku hormuud ka noqodo xalinta dhibka jira, iyada oo lala tashanayo urur-bulsheedyada jira. waxaa jiri doonaa qorsheyaal kala ah mid dhaw, mid soke iyo qorshe ku salaysan aragti fog, tubtan ayaa loo mari doonaa xalinta mishaakilaadka jira, waxaana jiri doonaa qiimayn sanadle ah.

C – Heshiis: Waaa heshiis ku salaysan in la helo farsamadii loo dhaqan galin lahaa istaraatiijiyaddii ahayd Hal aragti iyo Hal qorshe oo isku mid ah, waxaa ka wada qayb gali doona dhamaan ergooyinka, waxaana jiri doonta qiimayn sanadle ah .

Heshiiskan wuxuu tixgalin doonaa duruufaha ku xeeran dalka, caqabadaha jira iyada oo rajada laga leeyahay ay tahay isu keenis iyo wada heshiisiin dhamaan dhinacyada aragtida siyaasadeed ku kala geddisan, waxaa hawl-wadaag lala yeelan doonaa deeq-bixiyeyaasha, waxaa deeqda lagu jaangoyn doonaa hadba bahaida jirta iyo meesha looga baahan yahay, sidoo kale, heshiiska waxaa loo isticmaali karaa nidaam ku meel gaadh ah oo looga bixi karo dawladda ku meel gaadhka ah.

U – Nidaamka PSG in la raaco: Waxaan isticmaali doonaa tubta dawlad iyo nabad abuurista (PSG) si korka looga hayo horumarka dalka.

S – Taageerid wada-hadalada siyaasadeed iyo hoggaanka: Waxaan taageeri doonaa aragtida ah isu keenidda dhamaan ergooyinka kala matalaya iyo dhamaan wixii hinside ah ee ka yimaadda urur-goboleedyada iyo waddamada darska ah ee ku saabsan wada hadalo siyaasadeed iyo xal abuuris.

Waxaan sidoo kale taageeri doonaa inay ururada dhalinyarada iyo hooyooyinkuba ka mid ahaadaan nidaamkan.

III. KALSOONI – Go'aamo keena natiijo

Sida ku cad aragtida hiigsiga cusub, waxaa naga go'an inaan abuurno kalsooni keeni karta dhaqaale bixin iyo maaraynta deeqdaa, si loo helo natiijo wax ku ool ah. waxaan ku qanacsanahay mucaaddada ku qeexan Paris Declaration, Accra Agenda for action iyo midda dawladaha taagta daran (2007). nidaakman ayaan u isticmaali doonaa in la qiimeeyo meel-marinta iyo maaraynta deeqa baxday, baahida jirta iyo tayo u yeelidda dhamaan waaxaha loogu talo galay.

Qodobka ugu muhimsan ee hiigsiga cusubi waa in la helo ama la abuuro kalsooni buuxda oo ka dhaxaysa bulsahada, ururada iyo deeq bixiyeyaasha caalamiga ah. waa in la helo natiijo iyo dadaal joogto ah.

T – Isla-xisaabtan: Waxaan xaqiijin doonaa inuu jiro isla xisaabtan ku aaddan deeqda la bixiyo . waxaan dabagal ku samayn doonaa qaabka loo adeegsado deeqdaa iyo danaha shaqsiga ah ee soo dhexgali kara. waxaan awoodsiin u samayn doonaa hay'adaha dawladda iyo baarlamankaba si loo helo isla xisaabtan iyo nidaam hanti dhawt, hannaanka aan u mari doonno dabagalka hantida iyo deeqaduba waa mid lahaan doona hay'ado u gooni ah isla markaana la jaanqaadaya nidaamyada caalamiga ah ee caalamku raaco.

R – Khasaare-qaybsi: Waxaan qaybsan doonaa wixii khasaare ama dib dhac ah ee nagu yimaad. fulinta mashaariicda noocan oo kale ah waxay keenaan caqabado badan, waxayse dhaamaan inaan waxba laga qaban. waxaan yeelan doonaa qiimayn wada jir ah oon iska kaashano, kagana wada hadalno meelaha khasaaruhu ka iman karo iyo sida looga hor tagi karo. waa inaynu tilmaami karno xididka dib u dhacu ama khasaaruhu ka iman doono si looga gaashaanto mustaqbalka.

U – Isticmaalka hannaanka dawladeed: Waxaynu si wada jir ah ula socon doonaa dib u dhacyada meeshay ka yimaaddaan iyo sugidda isla xisaabtanka. waa inaan helno tallaabooyinkii fududayn lahaa hawshan si loo helo kalsooni wada shaqayn. waxay tani sare u qaadi ama tayo u yeeli abuurista hay'ado dawli ah dhanka kale waxay sare u qaadi kalsoonidii wada shaqayn ee naga dhaxaysay hay'adaha deeqda bixiya, waxaa imanaysa kordhin dhaqaalihii ama kaalmadii la heli jiray.

S – Tayo u yeelidda hay'aadka: Si loo helo hannaan shaqeeya isla markaana garab istaaga waaxyada dawliga iyo urur bulsheedyada rayidka ahba, waa inaan si wada jir ah tayo ugu yeelno nidaamka shaqo ee jira. waxaan yarayn doonaa mashaariicda faraha badan ee jira, waxaan xoogga saari doonaa kuwa dibadda laga qiimayn karo, si loo helo nidaam wada shaqayn iyo qorshe dajisan oo ay ku wada shaqayn karaan dawladda iyo ururo-caalamiyeedka deeqda bixiya.

T – Kaalmo xilligeedala yaqaan: Waxaan samayn doonnaa nidaam fudud iyo farsamo lagu maarayn karo dhaqaalaha iyo deeqda si loo dardar galiyo loona xaqiijiyo inay deeqdu u gaadho meelaha ugu baahida badan. dhanaka kalena loo qiimeeyo natiijadii iyo ahdaaftii aan wada dajisanay. waxaa naga go'an inaan samayno nidaam lagu saadaalin karo baahida loo qabi karo kaalmo si loo xaqiijiyo aragtida looga gol leeyahay dal dhisid iyo nabad abuuris labadana, waana midda ku cad mucaahadada Acra agenda for action.

Hiigsiga Cusub – Paris ilaa Busan

Aragtida hiigsiga cusub ee meeshan lagu soo bandhigay waxay ku salaysan tahay midda Paris declaration for aid effectiveness (2005), mabaadii'dacaalamiga ah ee hannaanka dawladeed ee dalalka taagta daran, (2007), bayaankii Kinshasa (2008), Agendaha Acra (2008), Bayaanka Dili consecutive ee kooxda G7+, Tubta Monrovia (2011) iyo barnaamijka ay bilaabeen kooxda ku bahawday " wadahadalka" waxaa sidoo kale loo hoggaansami doonaa xeeraraka caalamiga ah ee hay'adaha xuquuda bani aadam.

Kalfadhigi Cairo ee dardargalinta horumarka (Feb 2011), Kulankii Addis abeba ee dawlad iyo nabad abuuris (Sep 2011), dhamaantood waxay qayb ka ahaayeen suurogalnimada iyo dhaqan-galinta nidaamka Hiigsiga cusub.

Maadaama ay Nabad-abuuristu u baahan tahay istaraatiijiyad ku dhisan qorshe fog, waxaan dhaqan-galin doonaa Hiigsiga cusub inta u dhaxaysa 2012- 2015.

Wadahadalku Wuu socdaa

Si loo meel mariyo hawshan, wadahadalka waxaa ka go'an inay door lixaad leh ka qaataan dhaqangalinta nidaamka hiigsiga cusub iyo dadaalka loogu jiro in dalka laga saaro marxaladda kala-guurka, waxaan la iman doonaa aragti ah "lahansho" iyo inana hormuud ka noqono farsamooyinka caalamiga ah ee lagu keeni lahaa natiijo wanaagsan. hay'aadka caalamiga ee deeqda bixiyana waxay joogtayn doonaan kaalmada ay la garab taagan yihiin hawshan.

Waxaan ku heshiinay inaan samayno wadahadal si loo dhaqangaliyo hiigsiga cuusb, sida:

- **Hagid**- waxaan taageeraynaa hagidda aragtida hiigsiga cusub ee (PSGs, FOCUS iyo TRUST) ee dalalka iskoo isku xilqaamay sida Afganistan, sireleon,central african republic, south sudan, timor. si middan oo kale loo gaadho waxaan isla jaangoyn doonaa dhaqaalaha loo baahan yahay.
- **Xogsiin**- Waxaan ka soo warbixin doonaa dhaqangalinta hiigsiga cusub ee heerka waddan iyo midka caalamiba, waxaan isku raaci doonaa farsamooyinkii lagu dhaqan galin lahaa.